




Waad Dhihi, Weynu Dhageysan

**Sida Loo Bixiyo
Jawaab-Celinta iyo
Cabasho Loogu
Diro Tusla**

*Hage Loogu
Talagalay Caruurta
iyo Dhalinyarada*



TÚSLA

An Chniúmhairleacht um
Leanaí agus an Teaghlach
Child and Family Agency

Ku saabsan Tusla

Waxaan nahay Tusla—Hay'ada Ilmaha iyo Qoysaska. Shaqadeenu waa inay kaga jiraan caruurga iyo dadka yar amaan waxyeelada iyo in la daryeelo iyadoo lala shaqeynayo iyaga iyo qoyskooda.

Waxaan rabnaa inaan qabano shaqo wanaagsan oo waxaan rabnaa inaan sameyno waxyaalahu ku caawinayaadiga iyo goyskaaga. Wuxaad nagu caawini kartaa inaa shaqadeeda si ka sii fiican u qabano.

Noo Sheeg waxa aad u malaynayso iyo sida aan wax u hagaajin karno

Waan:

- kugu caawini doonaa adiga iyo qoyskaaga inaad noo sheegto waxa ay yihiin aragtiyadaada;
- dhageysan doonaa aragtiyadaada;
- u fici galin doonaa aragtiyadaada sida haboon.
- kuu sheegi doonaa sida aan uga jawaabnay jawaab-celintaada iyo cabashadaada.

Haddii aan qabaneyno shaqo fiican, waxaan rabnaa inaad noo sheegto sababtuna tahay mar walba ma ognii. Tani waxaa loo yaqaanaa jawaab-celin fiican.

Markaan helno jawaab-celin fiican, waxaan isku dayi karnaa inaan hubino inaan u sii wadno hawsha sida aad jeceshahay ama aad u aragno wax waxtar leh. Waanu awoodi karnaa shaqaalahu kale inay hawsha u qabtaan sida oo kale taasina waxay caawini doontaa caruurga kale.

Hadii aadan u malaynayn inaan qabano shaqo fiican, waad noo sheegi kartaa, Tani waxaa loo yaqaanaa cabasho. Cabashooyinka waxay nagu caawinayaan inaan ogaan waxa aan u sameyn karno si ka sii fiican iyo sida aan u samayn karno.

Maxaa dhaci doona markaad Noo Sheegto?

Haddii aad na siiso jawaab-celin, waan kula soo xiriiri doonaa.
Haddii aad cabasho sheegato, waxaan isku dayi doonaa

inaanu si dhakhso ah u xallino cabashadaada waxaana kula
soo xiriiri doonaa hal toddobaad gudhiis.

Waxaa laga yaabaa inaan u baahano inaan kula hadalno
oo aan kula kulanno, si aan si buuxda u fahano
cabashadaada.

Waanu eegi doonaa cabashadaada oo waxaan eegi doonaa
waxa laga qaban karo. Tani waxay qaadan kartaa ilaa iyo 30
maalmood. Haddii ay qaadato muddo sii dheer waan kula soo
xiriiri doonnaa 20 maalmood walba wixii intaas ka dambeeyaa
si aan kuu ogeysiino waxa dhacaya. Waan kuu soo sheegi
doonaa waxaan ka qabanay cabashadaada.

Haddii aadan ku faraxsanayn sida aan wax uga
qabanayno cabashadaada, waxaad codsan kartaa dib u
eegis. Tani macnaheedu waa in qof kale oo ka tirsan
Tusla oo aan kula shaqeynayn ayaa markaa eegi doono
cabashadaada.

Haddii aadan wali ku faraxsanayn taa ka dib, waxaad la xiriiri
kartaa Ombudsman-ka (xafiiska baarida cabashada) ama
Ombudsmana loogu talagalay caruurta oo weydii inay eegaan
cabashadaada:

Xafiiska Baarida Cabashada ee Caruurta

(Ombudsman for Children's Office), www.oco.ie

Email-ka: oco@oco.ie

Taleefanka Balaashka ah: 1800 202 040

Xafiiska Baarida Cabashada (Office of the

Ombudsman),

www.ombudsman.gov.ie

Email-ka: ombudsman@ombudsman.gov.ie

Taleefanka Balaashka ah: 1890 223 030

Fadlan Noo Sheeg

Haddii aan sameeneyno shaqo fiican;
Haddii aan u sameyn karno waxyaalaha
si ka sii fiican;
Haddii aad u malaynayso inaanan
shaqo fiican wadin.

Sidee baad Noogu Sheegi?

1. Wuxaad awoodaa inaad la hadasho qofka kula shaqeynaya ama waydiiso inaad la hadasho maamulahooda ama wixii qof Tulsa ka mid ah ee kula shaqeynaya.
2. Hadii aad rabto, qof aad ku kalsoontahay oo ku matalayo ayaa noo sheegi kara, ama waad weydiisan kartaa qofkaa inuu ku caawiyo.
3. Wuxaad kari kartaa inaad buuxiso foomka ku lifaaqan warqadan-yar oo u soo dir tellus@Tusla.ie, floor 4, brunel building, heuston south quarter, dublin 8 ama cinwaanka maxaliga ee hoos ku qoran.
4. Wuxaad buuxin kartaa foomka online-ka ee aad ka heli doonto www.tusla.ie
5. Wuxaad email noogu soo diri kartaa tellus@tusla.ie

Cinwaanka Maxalliga:

Foomka Jawaab-Celinta

Fadlan **Noo Sheeg** waa maxay magaca adeega? Waa

maxay cinwaanka adeega?

Maxaa dhacay?

Goorma iyo Xagee tani ka dhacday?

Yaa ku lug lahaa?

Maxay tahay sababta aad u rabto inaad wax nooga sheegto?

Foomka Jawab-celinta

(ka sii waddida bogga dambe)

Maxaad rabi laheed inaan ka qabano?

Magacaaga:

Cinwaanka:

Ama cinwaanka email-kaaga, si aan u awoodno inaan kula soo xiriirno:

Waxaad sidoo kale awoodaa inaad noo reebto lumbarka taleefankaaga haddii aad rabto inaan kaala soo xiriirno taleefanka:

Maclumaadkaan waa mid qarsoodi ah laakiinse waa laga yaabaa inaan wadaagno haddii aan aaminsanahay inay jирто wax khatar adiga kuu ah ama u ah wixii ilmo kale ah ama qof kale eeyar.